Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb
Diiwaanka Onleenka Dugsiga barbaarinta Pre-K
Su'aalaha Marwalba Lisweydiiyo

Ka qeybqaatayaasha Baqtiyaanasiibka Onleenka 2020-2021 Pre-K

Qeybtaan waxay siisaa warbixin waaladiinta/masuulada ka qeybqaatay ee nidaamka baqtiyaanasiibka onleenka 2020-2021 oo waxaa la ogeysiiyay helitaanka korsi ama lagu meeleeyo liiska sugitaanka. Hubi inaad aqrisid qeybta ugu dambeyso ee ku magacaaban, Warbixinta Muhiimka ah oo loogu tallogalay Dhammaan.

Waa maxay tallaabooyinkeyga xigo haddii canugeyga laga siiyo korsi baqtiyaanasiibka?

Haddii canugaaga laga siiyo korsi baqtiyaanasiibka, dugsigaaga ayaa si gaaban kuula soo xiriirayo. Dugsiga wuxuu u baahan karaa dokumintiga dib loo soo dirayo haddii aanan la aqrin karin ama taariiqda dhaafsan. Intaas waxaa dheer, dugsiga wuxuu codsanayaa in dokumintiyada haray loogu diro koronto ahaan dhinaca i-meelka. Liiska dokumintiga haray waxaa loo diray dhammaan waaladiinta/masuulada baqtiyaanasiibka kadib iyo markale Juun 30, 2020 laakin waxaa si fudud looga geli karaa websaydka degmada Pre-K ee: www.dekalbschoolsga.org/pre-k oo tixraaca ah.

Waa maxay tallaabooyinkeyga xigo haddii canugeyga la geliyo liiska sugitaanka inta lagu jiro nidaamka baqtiyaanasiibka?

Arday walba oo aanan loo xulan korsiga baqtiyaanasiibka waxaa si toos ah loo geliyaa liiska sugitaanka. Nidaamka wuxuu lambar ahaan ugu amraa ardayda liiska sugitaanka. I-meel ayaa loo diray si ay u ogeysiiso waalidka/masuulka meeleynta canuga ee liiska sugitaanka. Sida kuraasta loo diido ama loo lumiyo, dugsiga wuxuu ogeysiinayaa qoyska xiggo ee ku jiro liiska sugitaanka. Waqtigaas, waxaa lagaa rabayaa inaad dhameystirtid tallaabooyinka xiggo oo lagu lifaaqayo korsiga canugaaga. Dugsiga wuxuu aqoonsanayaa wakiilka diiwaangelinta oo kala xiriirayaa waalidka/masuulka dokumintiyada loogu dirayo koronto ahaan -imeel.

Codsadayaasha Cusub oo Aanan Ka qeybqaadan Baqtiyaanasiibka Onleenka 2020-2021 Pre-K

Qeybtaan waxay siisaa warbixin waaladiinta/masuulada oo aanan u suurtogelin ka qeybqaadashada nidaamka baqtiyaanasiibka onleenka 2020- 2021 iyo /ama loo diray arjiga liiskasugitaanka dugsiga deegaanka. Hubi inaad aqrisid qeybta ugu dambeyso ee ku magacaaban, Warbixinta Muhiimka ah oo loogu tallogalay Dhammaan.

Sidee ayaan ugu codsan karaa korsiga Pre-K canugeyga haddii qoyskeyga aysan ka qeybqaadan baqtiyaanasiibka?

Ku bilow la soo xiriirida dugsiga si aad u aragtid haddii uu jiro korsi la heli karo. Haddii uu jiro korsi furan, fadlan ku sii soco su'aasha xigto. Haddii aysan haynin kuraas la heli karo, ku soo dhawow inaad buuxisid arjiga liiska sugitaanka oo koronto ahaan ugu soo dir i-meel wakiilka diiwaangelinta dugsiga. Haddii aadan hubin cid uu yahay wakiilka diiwaangelinta dugsiga, fadlan la soo xiriir dugsiga. Arjiga liiska sugitaanka waxaa laga heli karaa hoosta bogga, hoosta badhanka "Apply Now", ee websaydka degmada Pre-K. www.dekalbschoolsga.org/pre-k.

Waa maxay tallaabooyinka xiggo ee la isaga diiwaangeliyo Pre-K haddii dugsiga uusan laheyn kuraas la heli karo?

Ku dhameystir Arjiga Diiwaangelinta Cusub ee 2020-2021 onleenkaadiga oo riixayo ciwaanka xiggo https://www.dekalbschoolsga.org/online-registration/new-students/.

Maxaa dhaca kadib markii aan dhameystiro Arjiga Diiwaangelinta Ardayga Cusub ee 2020-2021?
Dugsiga deegaankaaga ayaa kuula soo xiriirayo si ay kuula wadaagaan warbixinta la xiriirta dokumintiyada looga baahanyahay in lagu dhameystiro nidaamka diiwaangelinta.

Dokumintiyadee ayaa looga baahanyahay in ardayga iska diiwaangeliyo Pre-K?
Liis dhameystiran oo dhammaan dokumintiyada loo baahanyahay waxaa laga heli karaa iyada oo la riixayo badhanka "Nidaamka Baqtiyaanasiibka" ee laga helay ciwaanka xiggo https://www.dekalbschoolsga.org/pre-k/.

Warbixin Muhiim ah ee loogu tallogalay Dhammaan

Ka waran haddii aanan bixin karin Foomka Tallaalka Caafimaadka 3231 oo bilowga dugsiga?
Xeerka DCSD wuxuu sheegayaa in canuga uu haysto foomkooda Tallaalka Caafimaadka 3231 ee feelka ku jiro oo gudaha 30 maalmood oo canugooda bilaabayo dugsiga ama taariiqda dhacitaanka. Sabab la xiriirto cudurka safmarka Covid-19, fadlan i-meel ku soo dir dugsigaaga haddii aad la kulantid dhibaato oo helitaanka iyo ku soo dirista dokumintigaan si koronto ah. Degmada waxay sii wadeysaa inay kormeerto xaalada cudurka safmarka COVID-19 oo sameyneyso go'aanada mustaqbalka xiliga hagida ka imaaneyso Guddiga Caafimaadka Gobolka DeKalb, Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka, iyo Waaxda Caafimaadka Bulshada. Haddii foomka aan lagu bixin 30 maalmood gudaheed markii dugsiga dib loo furo, canuga uma suurtogaleyso inuu ku soo laabto fasalka iyada oo aan jirin foomka ama cadeynta balanta. Canuga uma suurtogaleyso inuu ku soo laabto kadib balanta aan foom la cusbooneysiiyay laheyn. Haddii canuga maqnaado 10 maalmood isku xigto sabab la xiriirto foomkaan oo aan la bixin korsiga canuga ee Pre-K wuu lumayaa.

Ka waran haddii aanan bixin karin Foomka Maqalka. Araga, Ilkaha iyo Nafaqada 3300 oo bilowga dugsiga? Xeerka DCSD wuxuu sheegayaa in foomkaan uu ugu jiro feelka gudaha 90 maalmood oo canuga bilaabayo dugsiga ama taariiqda dhacitaanka. Sabab la xiriirto cudurka safmarka Covid-19, fadlan i-meel ku soo dir dugsigaaga haddii aad la kulantid dhibaato oo helitaanka iyo ku soo dirista dokumintigaan si koronto ah. Degmada waxay sii wadeysaa inay kormeerto xaalada cudurka safmarka COVID-19 oo sameyneyso go'aanada mustaqbalka xiliga hagida ka imaaneyso Guddiga Caafimaadka Gobolka DeKalb, Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka, iyo Waaxda Caafimaadka Bulshada. Haddii foomka aan lagu bixin 30 maalmood gudaheed markii dugsiga dib loo furo, canuga uma suurtogaleyso inuu ku soo laabto fasalka taas oo sababi karto in canuga laga saaro barnaamijka.

Miyuu jiraa xeerka ka qeybgalka oo ardayda Pre-K?
Haa, waxaa jiro xeerka ka qeybgalka oo loogu tallogalay ardayda Pre-K. Sabab la xiriirto COVID-19, badelada ka qeybgalka ayaa la aasaasay. Ardayda waxaa laga filanayaa inay ka qeybqaataan inta lagu jiro maalinta Pre-K taas oo ka kooban waxbarashada onleenka 1-saac iyo kadib waqtiga haray oo lagu dhameystirayo howlaha maalinlaha ee uu bixiyay macalinka Pre-K. Maalmaha oo casharka dhaafayo, sabab la xiriirto balamaha ama dhacdooyinka kale ee aan la arag, kulanka onleenka la duubay ayaa laga fiirin karaa waqti dambe. Markii dugsiyada dib loo furo, ardayda waxaa laga filanayaa inay ka qeybgalaan maalinta waxbarashada buuxdo inta lagu jiro sannad dugsiyeedka oo dhan. Haddii canuga soo daaho ama maqanyahay toban maalmood isku xigto iyada oo aan jirin cudur daar caafimaad, canuga waa laga saarayaa fasalka sida ku saleysan hagidaha ay bixiyaan Bright ee Bilowga ah. Intaas waxaa dheer, la taliyaha iyo/ama shaqaalaha bulshada ayaa la soo xirirrayo waaladiinta/masuulada haddii canuga leeyahay naqshada soo daahitaanka xad dhaafka ah ama ka tagida dugsiga xili hore.

Miyay jiraan wax sharuudaha ka qeybqaadashada ee waaladiinta/masuulada Pre-K?
Haa, waaladiinta/masuulada waxaa laga filanayaa inay ka qeybqaataan dhammaan kulmada waalidka/masuulka jadwaleysan iyo shirarka ugu yaraan labo jeer sannadkiiba iyo inta badan haddii ay muhiim tahay. Sabab la xiriirto cudurka safmarka COVID-19, kulamada waxay ku dhacayaan onleenka. Dugsiga iyo/ama macalinka Pre-K ayaa ku soo ogeysiinayo goorta waqtiyada kulanka/shirka dhacayo oo bixiyo ciwaanada ku haboon oo loogu soo biirayo kulanka/shirka onleenka. (Markii dugsiyada dib loo furo, howlahaan waxay soconayaan qiyaastii hal saacadood).

Qeex waaya aragnimada waxbarashada fogaanta onleenka ee loogu tallogalay ardayda Pre-K iyada oo dugsiga bilaabanayo.
Degmada waxay bixineysaa 4-isbuuc, oo caanshida howlaha-guriga ee loogu tallogalay dhammaan ardayda Pre-K oo la dhameystiro karo iyada oo aan la isticmaalin cilmiga farsamada. Howlaha-guriga waxaa la sameeyaa afar isbuuc ee walba inta lagu jiro waxbarashada onleenka iyo qabashada Farbarashada, Xisaabta/Sayniska, afkaaraha waxbarashada Dareenka Bulshada iyo Dhaqaaqa Guud/Dhaqaaqa si loo sahmiyo oo loo barto. Macalinka Pre-K wuxuu bixinayaa ciwaanka waxbarashada oo laga geli karo qalab walboo koronto ah.

Ka wraan haddii aan su'aalo qabo oo aanan lagu sheegin FAQ?
Xoriyad dareen aad kula soo xiriirtid Xafiiska Carruurnimada Hore ee PreKRecords@dekalbschoolsga.org